



## Qolka Dharka ee PTA oo sii wada inuu dhar siiyo ardayda PPS

Tan iyo 1963-kii, Qolka Dharka ee PTA wuxuu ka hawlgalayay Dugsiyada Dadweynaha Portland waana mid aad looga yaqaan marka la eego PTA Xeebta Galbeed isaga oo ku caan ah ururkiisa iyo tirada ardayda ee uu dharka siiyo sanad kasta. Sanadkii la soo dhaafay Qolka Dharku wuxuu u adeegay in ka badan 1,600 arday, iyada oo tiradaasi kor u kacdo marka ay qoysasku la kulmaan dhibaatooyin dhaqaale.

Waa mid ay si gaara gacanta ugu hayaan tabarucayaal, qaar badan oo ka mid ahi waxay soo siiyeen waqtigooda iyo tamartooda muddo ka badan 20 sano. Qolka Dharka oo ay aqoonsan tahay Magaalada Portland, ayaa helay aqoonsiga Horyaalada Dhanka Isbeddelka ee Madaxweyne Obama, wuxuuna dhiirigelin u yahay kuwo badan oo kale oo ka tirsan PTA oo isku dayaya in ay sameeyaan waxyaabo taasi la mid ah: dhar la siiyo carruurta.

Qolka Dharku wuxuu ka yaala dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall (3901 SE 91st Ave.), qolka C-56, waxaana heli karaya dhammaan ardayda PPS K-12 Isniinta iyo Khamiista laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 1 galabnimo. Isaga oo furnaa laga soo bilaabo Sibtambar ilaa Abriil, waa meel ay carruurta ka qaadan karto surwaalo, dharka la xirto ee qaybta sare ee jirka, funaanado, kabo, sharabaadyo, kastuumooyin, jaakado, qalabka dhanka nadaafadda iyo nadaafadda shakhsi ahaaneed oo cusub ama aan si aad ah loo isticmaalin. Dhammaantood waa lacag la'aan.

“Ma aha wax aan caadi ahayn in carruurta ay yimaadaan, oo ay la adeegtaan waalidiintooda ama mas’uulkooda iyo in ay guriga ku xirtaan jaakado cusub ama shay kale dhar ah, taasi oo ah sababta aan dadka uga codsano in ay soo diraan waxyaabaha ay caruurtooda la jeclaan lahaayeen in ay xirtaan,” ayay sheegtay Sharon Meigh-Chang, oo ah Agaasimaha Qolka Dharka ee PTA. “Waa arrin sharaf leh in la haysto dhar nadiif ah iyada oo ay had iyo jeerna ay rajadayadu tahay in dadku noo soo diri doonaan waxyaabo la isticmaali karo markiiba.”

Markaa, sidee ayuu u shaqeeyaa? Dugsi kastaa wuxuu leeyahay kaararka wax lagu qaato oo laga helayo xafiiska guud ama iyada oo la sii marayo la taliyayaasha dugsiga. Ardayda dhigata fasallada K-8, waalid ama mas’uul ayaa buuxin kara magaca iyo cabbirka loogu talagalay carruurtooda wayna raaci karaan iyaga marka ay diyaar u yihiin in ay soo adeegtaan. Ardayda dugsiga sare waxay sidoo kale u baahan yihiin in ay buuxiyaan kaar, laakiin waxay iskood u booqan karaan Qolka Dharka. Ardaydu waxay soo adeegan karaan laba jeer sanadkiiba, hal wakhti oo ka horreeya fasaxa jiilaalka iyo hal wakhti oo ka dambeeya wakhtiga fasaxa ah.

Qolka Dharku wuxuu qaadi karaa 60 qof maalin kasta iyada oo macaamiisha laga codsado in ay saf ku galaan bannaanka xarunta waxaana loo wacaa iyada oo lambarkooda la yeerinayo. Marka ay gudaha soo galaan, ardayga waxaa la siiyaa saddex kastuumo ama sharabaad oo wada socda, dhowr surwaal, jaakad iyo laba shaati. Marka ardaydu helaan waxyaabahani, waxay markaasi aadi karaan goobta ay yaalaan dharka la isticmaalay waxayna soo qaadan karaan dhar dheeraad ah si ay u buuxiyaan halka ay dhigtaan dharkooda dayrta/jiilaalka. Wakhtigan soo adeegashada waa mid uu cudurdaar u yeelay dugsigu.

Inkasta oo Qolka Dharku uu had iyo jeer ay u baahan tahay deeqo, hadana hadda wuxuu u baahan tahay dharka jiilaalka oo diiran kuwaasi oo cusub ama aan si aad ah loo isticmaalin oo aan u baahnayn in la dayactiro ama la dhaqo. Dharka waxaa lagu dhaafi karaa dugsiga PPS waana in ay ku jiraan baco si cad loogu calaamadeeyay “PTA CLOTHING CLOSET.” Xaruntu waxay kaloo u baahan tahay dhalooyinka biyaha, furaashyada/joodariyaasha bacda ka sameysan, boorsooyinka adag ee dhogorta ka sameysan ‘duffel bags’, gacmo gashiyada ‘mittens’, qalabka dhanka nadaafadda oo yar oo loogu talagalay safarka iyo nadaafadda shakhsi ahaaneed, jaakado, surwaalo, funaanado, shaatiyo, keeshali/rajabeeto, kastuumooyin, sharabaadyo iyo kabo.

Meigh-Chang waxay sheegtay in ay “aad ugu mahadcelinayso kuwo badan oo ka mid ah shirkadaha dharka iyo kabaha ee Pacific Northwest kuwaasi oo sanado badan wax ku deeqayay. Waxaa jiray arday u baahnaa cabbirka dharka ee 3XXX iyo cabbirka kabaha ee 16. Dareen wanaagsan ayay lahayd awoodida in la daryeelo isaga.”

Ma rabtaa in aad tabaruc sameysid? Qolka Dharku wuxuu jeclaan lahaa in uu helo caawimaadaada. Si aad u ogaado waxyaabo dheeraad ah fadlan Sharon Meigh-Chang kala xiriir 503-293-0783 ama [ptaclothingcenter@comcast.net](mailto:ptaclothingcenter@comcast.net).

*-Cameron Vaughan*